# JAMHUURIYADA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILADA

---

## XEERKA LA DAGAALANKA MUKHAADARAADKA

## (XEER Lr. 21/2002)

# Jamhuuriyadda Somaliland
# GOLAHA WAKIILADA

GW/KF-16/208/2002 17/02/2002

**GO'AAN ANSIXIN XEERKA LA-DAGAALANKA MUKHAADARAADKA (Xeer Lr.21/2002)**

## GOLAHA WAKIILADA JSL

**Markuu Arkay:** Qodobada 5aad, 16(4)aad iyo 128(1)aad ee Dastuurka oo ku saabsan in shareecada Islaamku saldhig u tahay xeerarka & shuruucda JSL lagaga dhaqmayo, wixii ka soo horjeedaana yahay waxba kama jiraan.

**Markuu Tixgeliyay:** Mashruuc-sharciga ku saabsan Mukhaadaraadka ee Golaha Guurtidu curiyey, una soo gudbiyey Golahan, si uu xeer uga soo saaro.

**Markuu is Tusay:** Baahida loo qabo xeer lagu xakameeyo mukhaadaraadka ku soo faafaya dalka taas oo ku iman karta wax ka bedel lagu sameeyo xeerarka u yaala.

**Markuu Dhagaystay:** xogwaranka Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo Wasiirka wasaaradda Awqaafta iyo Arrimaha diintu ka bixiyeen mukhaadaraadka iyo talooyinka ay ka soo jeediyeen la dagaalankeeda

**Markuu u codeeyay:** ansixinta Mashruuc-sharciga La-dagaalanka Mukhaadaraadka, fadhigii 17/02/2002 oo ay goob-joog ahaayeen 45 Mudane,

## WUXUU

Cod aqlabiyad ah (41 cod) oo gacan taag ah ku ansixiyey **Xeerka La-dagaalanka Mukhaadaraadka (Xeer Lr. 21/2002),** halka 1 Mudane ka diidey, 2 Mudane oo kalena ka aamuseen, Gudoomiyuhuna aanu cod bixin sida u caadada ah.

**ALLAH MAHAD LEH**

**Maxamed Xuseen Cisman**
**XOGHAYAHA GUUD G/WAKIILADA**

**C/qaadir X. Ismaciil Jirdeh**
**K/S GUDOOMIYAHA G/WAKIILADA**

**XEERKA LA DAGAALANKA MUKHAADARAADKA**

**(Xeer lr.21/2002)**

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:** | Qodobada 5aad, 16(4)aad ee Dastuurka Qaranka oo ku saabsan in Shareecada Islaamku saldhig u tahay xeerarka & shuruucda lagaga dhaqmayo, wixii ka soo horjeedaana yahay waxba kama jiraan. |
| **Markuu Helay:** | Mushruuc-sharciga ku saabsan mukhaadaraadka ee Golaha Guurtidu curiyay, una soo gudbiyey Golahan |
| **Markuu Dhegaystay:** | Xog-waranka wasiirka awqaafta & Arrimaha Diinta & Xeer-ilaaliyaha Guud ka bixiyeen mukhaadaraadka iyo talooyinka ay ka soo jeediyeen la dagaalankooda. |
| **Markuu ku qancay:** | Baahida loo qabo xeer la socon kara wakhtigan oo lagu xakameeyo mukhaadaraadka dalkeena ku soo faafaya. |

**WUXUU ANSIXIYEY XEERKAN**

## QODOBKA 1AAD

## MICNAHA EREY-BIXINTA

| | |
|---|---|
| **Maandooriye:** | Waxa loo la jeedaa shaykasta oo isticmaalkiisu bedelo xiska Aadamaha oo keeni kara sakhrad muddo dheer ama muddo gaaban sifa kasta ha lahaadee. |
| **Isticmaalka:** | Waxa loola jeedaa sifa kasta oo loo qaato maandooriye sida cabbid, qiijin, ursasho, turqin irbad, shidasho, cunid iwm. |
| **Caadayste:** | Waxa loola jeedaa qof kasta oo bariinsday isticmaalka maandooriye ee lagu cadeeyay sida xeerkan timaamayo. |

## QODOBKA 2AAD

## REEBANAANTA MAANDOORIYAHA

Beerista, samaynta, ka ganacsiga, soo galinta, haysashada iyo isticmaalka dhamaan maandooriyayaashu way ka reebban yihiin gayiga Somaliland.

## QODOBKA 3^AAD

## ISTICMAALKA MAANDOORIYAHA

1. Qofkii isticmaala maandooriye ee ay maxkamad horteed kaga cadaato waa lagu ciqaabayaa karbaash dhan afartan (40) jeedal iyo lix bilood ilaa hal sano oo xadhig aan iib lahayn.
2. Qofkii ku isticmaala maandooriye meel fagaare ah ama dadweynaha u furan ama shakhrad ku muuja meel fageere ah ama dadweynaha u furan waxa lagu ciqaabayaa ciqaabta ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan, waxa kale oo loogu siyaadinayaa ganaax dhan 500,000 Sl.Shillin ilaa **1,000,000** Sl. Shillin oo hadduu bixin waayo loogu bedelayo xadhig u dhigma.
3. Qofku hadduu yahay mid caadaystay isticmaalidda maandooriyaha waxa lagu ciqaabayaa karbaash dhan afartan (40) jeedal ama hal sano ilaa laba sano oo xadhig aan iib lahayn iyo ganaax lacageed oo dhan **2,000,000** Sl. Shilin oo hadduu bixin waayo loogu bedelayo xadhig u dhigma.
4. Caadayste waxa loo aqoonsanayaa qof kasta oo ay maxkamad horteed kaga cadaatay isticmaal maandooriye afar jeer ugu yaraan.
5. Qofkii siiya maandooriye qof da'diisu ka yar tahay 15 sano ama qof xiskiisu dhiman yahay ee maxkamad horteed kaga cadaato waa lagu ciqaabayaa xadhig dhan seddex sano oo aan iib lahayn iyo ganaax lacageed oo dhan **1,000,000** ilaa **2,000,000** Sl. Shillin oo haddii uu bixin waayo loogu bedelayo xadhig u dhigma.
6. Qofkii u qariya ama ku khasba qofkale shay maandooriye ah ama cunto ku dara ee dadweynaha u soo bandhiga ee ay maxkamad horteed kaga cadaato waxa lagu ciqaabay ciqaabta ku xusan farqadda 5^aad ee qodobkan.

## QODOBKA 4^AAD

## KA GANACSIGA, SAMAYNTA, SOO GALINTA MAANDOORIYE

1. Qofkii dalka soo galiy ama beera ama sameeya ama ka gacansada ama si uun u haysta maandooriye ee lagu helo waxa lagu ciqaabayaa xadhig dhan saddex sano ilaa shan shan sano oo aan iib lahayn iyo ganaax lacageed oo dhan 3,000,000 ilaa 5,000,000 Sh. Shillin oo haddii u bixin loogu bedelayo xadhig u dhigma.
2. Waxa la baabi'inayaa dhamaan maandooriyihii la qabtay, kii la beeray, qalabkii lagu beeray ama lagu sameeyay.
3. Wadaha gaadiidka dalka soo galiya maandooriye nooc kasta oo uu yahay (mid dhul, cir iyo bad) ee ay maxkamad horteed kaga cadaato waxa lagu ciqaabayaa ciqaab ku xusan faqradda 1^aad ee qodobkan.
4. Gaadiidka lagu qabtay maandooriye ee ay maxkamad horteed kaga cadaatey waxa marka koowaad lagu ciqaabayaa ganaax lacageed oo dhan 5% qiimaha gaadiidka iyo digniin

qoraal ah oo la siinayo mulkiilaha. Marka labaad waxa la ganaaxayaa 10% qiimaha gaadiidka , marka seddexaad waa lala wareegayaa.

5. Deganaha guriga (dhismaha) lagu iibiyo maadooriye ee ay maxkamad horteed kaga cadaato waxa lagu ciqaabayaa ciqaabta ku xusan faqradda 1aad ee qodobkan iyadoo digniin qoraal ahna la siinayo marka koowaad mulkiilaha guriga, marka labaadna ee lagu helo waxa mulkiilaha guriga lagu ganaaxayaa 2% qiimaha guriga, marka sadexaad ee lagu helo waxa lagu gnaaxayaa 5% qiimaha guriga, marka afraad ee lagu helo waa lagala wareegayaa dhismaha.

## QODOBKA 5AAD

## BEDELAAD IYO BURIN

xeerkan wuxuu bedelayaa qodobada 411,412,413,414,415,416,417,342, iyo 343 ee Xeerka Ciqaabta Guud, waxa kale oo uu burinayaa xeer kasta oo ka soo hor jeeda.

## QODOBKA 6AAD

## DHAQANGALKA

Xeerkani wuxuu dhaqangalayaa marka Baarlamaanku ansixiyo, Madaxweynaha JSL saxeexo.

**ALLAA MAHAD LEH**

| | |
|---|---|
| **Maxamed Xuseen Cismaan** | **C/qaadir X. Ismaaciil Jirdeh** |
| **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** | **K/S Gudoomiyaha Golaha Wakiilada** |